

# Fulinta Kooban ee Qorshaha Hagaajinta Adegga Safarrada Tareenka Metro (Executive Summary for the Metro Transit Bus Service Improvement Plan)

## Hordhac

Adeegyada baska ee wax-ku oolka ah waa qayb muhiim ah nidaam gaadiid guul leh ee degaanka magaala weynta Minneapolis-St. Paul. Adeegyada baska waxaa ka mid ah marinada xaafadaha ee joogsiga ku samaynaya 1/8<sup>th</sup> illaa ¼ mayl kasta, baska dheereeya (BRT) ee u kala gooshaya gaadiidka isku milan iyo uu kala aadeegaya joogsiyada sii kala fog iyo raakaabka marinada dheereeya ee ka shaqeeya gaar ahaan subaxyada caadiga ah iyo saacadaha gaadiidka badan ee habeennimada, ee ka aadeegaya joogsiyo ka sii yaryar.

The *Metro Transit Service Improvement Plan* (SIP) waxa ay wax ka sii wadaysaa maarinnada basaska hadda jira iyo lagu aqoonsanayo fursadaha lagu darayo marinno cusub iyo lagu kordhinayo soc-socodka iyo dhererka ka jira marinada illaa iyo sanadka 2030. Himilooyinka, mashruucyada iyo mudnaashooyinka waxa lagu dhisay ayadoo la isticmaalayo affarta iloodo ee muhiimka u ah – *Thrive MSP 2040* natiijooyinka iyo mabaadiida, *2040 Transportation Policy Plan (TPT)* ujeedooyinka iyo himilooyinka, asaaska qorshaynta gaadiidka iyo fikaradaha badan ee dadwaynaha. Ujeedooyinka waxaa ku jira hoggaanka nidaamka gaadiidka, ammaanka iyo xasilloonida, helitaanka meelaha loo socdo, dhaqaale isku dubbaridan, jawi caafimaad qaba iyo iskushaandhaynta maalgalinta gaadiidka ee lagu hagayo isticmaalka dhulka.

SIP waxa ay soo jeedinaysaa adeegyada baska dheereeya ee cusub ama la hagaajiyay ee ku jira deegaanka adeegyada Metro Transit iyo waxaa ku sii jira qorshaynta balse aan weli dhaqaale loo hayn adeegyada marinada BRT. Rakaabka tareenka, tareenka fudud iyo hagaajinnada waddooyinka waaweyn ee BRT kuma ay jiraan SIP sababto ah gobolka qorshahiisa muddada dheer ee lagu fidinayo gobolka xariirkiisa waddooyinka waxaa lagu falanqaynayaa TPP. Balse isku xirka hagaajinta adeegyada basaska xaafadaha ee taageeraya mashruucyadaan waa ay ku jiraan. SIP looguma talagalin in ay noqoto qorshaha hagaajinta gaadiidka dhammaystiran ama qorshaha maalgalinta, balse waxa ay isku duwaysaa hagaajimada iyo muhiimadaha sida ay maanta yihiin. Saamayn kuma ay yeelanayso waxa ka soo baxa adeegyada deegaanka Metro Transit iyo kuma ay jiraan maalgalinta dhaqaalaha la xariira (gawaarida, macaamiisha iyo dhismayaasha taagerada, kor u qaadista sancada, iwm).

Metro Transit waxa ay tahay bixiyaha gaadiida guud ee ugu weyn ee shanta gaadiid bixiyaasha guud ee degaanka. TPP waxa ay ka rabtaa mid kasta ee ka mid ah gaadiid bixiyayaasha in ay samaystaan SIP u gaar ah, kaddibna ay ka wadashaqeeyaan isku biirinta mashruucyada ee sanadaha bilowga ah ee SIP kasta ka mid noqonaya qorshaha Regional Service Improvement Plan (RSIP). RSIP waa qorshe affar-illaa shan-sano ee ku toosinaya hagaajinta adeegyada baska ee dhammaan gaadiid bixiyayaasha degaanka, waxaana la cusbonaysiin doonaa 2015.

## **Daneeyayaasha iyo Gacansaarka Hore ee ka Qaybgalka Guud (Stakeholder and Public Engagement Early Outreach)**

Waxa sii dheer fikradaha ku saabsan hagaajinta marinka ee maalin kasta loo gudbinayo Metro Transit Customer Relation, darewallada iyo qorsheeyayaasha gaadiidka, Metro Transit waxa ay soo aruurisay fikradaha hore ee daneeyayaasha iyo midda dadweynaha si lagu dhiso hagaajinnada qancinaya baahida xagga gaadiidka oo ay jaalliyadda u bahaantahay. Bandhigyadii dhacay dhammaaka 2013 waxa la isu horkeenay daneeyayaasha si ay ku aqoonsadaan iyo culeyska saaraan rabitaanka safarradeed ee jaalliyadda. Waxaa si dheer, sahan jawaabaha lagu weydiinayay in ay aqoonsadaan sifooyinka adeegyada baska ee ayaga ku dhiirrigalinaya in ay si dheeraad u kordhiyaan raaciitaanka gaadiidka, waxa ay farta ku fiiqayaan laxjecladooda adeegga baska iyo sida ay ugu maalgalinayaan koru qaadista hagaajinta gaadiidka haddii dhaqaale dheraada uu jiro. Daneeyayaasha iyo dadwaynaha waxa ay soo gudbiyeen ku dhawaad 4,000 ee jawaabaha sahanka. Ayadoo baadigoobaysa jawaab-celin, shaqaalaha Metro Transit waxa ay culays gaar saareen aruurinta fikradaha laga soo qaadayo dadwaynaha aan sida badan horay ay fikradahooda meesha ku yaraayeen. Muhiimadaha jawaab-celinta waxaa ka mid ahaa:

- Ku dhawaad aqlabiyad ah ee lagu tageerayo fidinta adeegga baska ee la siinayo dadka ay noloshoodu ku xirantahay gaadiidka dadwaynaha. Guud ahaan, waxaa jira doorbidaad ah in la xoojiyo adeegga ka jira isla degaannada ay basaska maraan marka la barbardhigo fidinta adeegga baska ee hadda uusan ka shaqayn gaadidka guud.
- Tiro fiican ee jawaabayaasha badankood waxa ay doorbideen in ay isticmaalaan gaadiidka guud inta ugu badan ee suurtagal ahaan ku filan iyo si kordhiyaan racitaanka haddii shaqada gaadiidka la hagaajiyo.
- Marka gaari wadista ay tahay fursad u macaamilka haysto, qaabka ugu badan nooca sababaya doorashada waxa ay tahay faraqa u dhaxeeya waqtiga ee gaariga lagu safrayo iyo gaadiidka guud. Sifooyinka la xariira isticmaalka gaariga, sida kharashka iyo helitaanka meelaha gaariga la dhigto iyo qiimaha shidaalka waxa ay ahaayeen sabaha muhiimka ah.

## **Xilliga Falanqaynta Dadwaynaha (Public Comment Period)**

Marka ay ahayd Nofeembar 2014 Metro Transit waxa ay qabanqaabisay xilliga falanqaynta dadwaynaha ee Draft SiP. Waxaa jiray siyaabooyin ay macaamishaa, ururrada jaalliyahada ku salaysan, dadka jagooyinka loo doortay iyo daneeyayaasha kale ay ku bartaan hagaannimada qaaska ee Qorshaha (Plan):

- Shabakadda mashruuca: [metrotransit.org/sip](http://metrotransit.org/sip)
- Kulamada jaalliyadda iyo dhegaysiyada guud: Metro Transit martigalisay shan kulan ee jaalliyadda iyo hal dhgaysi ee guud. 78 qof ayaa ka qaybgalay kulamada.
- Macluumaadka lagu bixiyay maktabado la doortay, basaska gudahooda, ku jirto *Connect* (Metro Transit warqadaha ay macaamisha u dirto), YouTube iyo warbaahinta bulshada, qoraallada rasmiga ee wargaysyada lagu daabaco
- Metro Transit's Community Outreach Coordinator waxa ay xariir la yeelatay ururrada jaalliyada ku salaysan

Metro Transit waxa ay 176 qof iyo ururro ka heshay xiriir qaa ah iyo ku dhowaad 600 talooyin ee la xariira hagaajinnada adeegga. Faallooyinka ay heleen shaqaalaha hay'adda waxa ay ku saabsanayd

qaybo badan ee Draft Plan ee la xariira marin qaas ah illaa faallooyin guud ee ku saabsan xariirka gaadiidka guud. Waxaa jiray faallooyin badan ee taageerayay hagaajinta guudahaaneed ee adeegga iyo xasuusinta muhiimadda fidinta gaadiidka ayadoo uu deegaanka sii kobcayo iyo isbaddalayo.

NOOCA FAALLADA	# FAALLADA
Fikrad Cusub ee Hagaajinta Adeegga	216
Fikradda Hagaajinta Adeegga ee Taageeraya Draf	161
Fikradda Baddaladda Hagaajinta Adeegga ee Draft	69
Fikrad Guud – Ma Jirto Adeeg Qaasa ee Qorshaynta Hagaajinta	104

- Dabaqadaha ugu muhiimsan ee jawaab-celinta, ku dhawaad 25 faallo, ee la xariira tiraada soc-socodka iyo saacadaha adeegga ee mariinnada baska ee hadda jira.
- Ku dhawaad 125 faallo ee xoogsaaray nidaamka uu ku dhisanyahay mariinnada adeegga baska.
- Qiyaasi 100 faallo waxa ay la xariireen hagaajinta adeegga loo fidnayo meelaha aan adeegga lahayn ama mid kooban leh iyo isusocodka dhinac kale (keenista degganayaasha magaalada hoose ee shaqooyinka hareeraha magaalada).
- Ku dhawaad 70 faallo ee la xariira nidaamka qorshaynta SIP iyo 50 faallo ee laga soo gudbiyay waxa ku saabsan muhiimada hagaajinta waqtiga la safrayo.

Draft SIP waxaa wax laga baddalay ayadoo la eegayo jawaab-cellinnada la helay muddadii xilliga faallooyinka.

### **Mabaadi'ida La Raacyo (Guiding Principles)**

Metro Transit waxa ay isku daraysaa dhinaca siyasaadda oo ay ku jiraan ujeedooyinka iyo waxtarka gaadidka ee lagu aqoonsaday bandhigyada iyo sahanka, iyo lago ogaaday toddobada mabda' ee hagaya dhisidda nidaamka SIP:

- Aad loo ballaariyo koritaanka gaadid raaceyaasha
- Culeys la saaro mashruucyada waxsoosaarka sarreeya iyo/ama kuwa taakulaynta hoose
- La bixiyo waqti ahaan safar dheereeya
- Kor loo qaado isku xiritaanka nidaamka gaadiidka
- La taageero dhulka gaadiidka ku habboon isticmaalka dhulka iyo muhandisnimada
- La ballaariyo ujeedooyinka adeegga saacada gaadidka yar iyo kuwa aan shaqada la xariirin
- La hagaajiyo caddaaladda gaadiidka

### **Aqoonsashada Habraca Mashruuca (Project Identification Methodology)**

Metro Transit waxa ay isitmaahay dhowr ilo ee fikrado laga yaabo in loo saameeyho hagaajinta adeegga baska. Ilaha waxaa ka mid ah jawaabaha sahanka, hannaanka codsashada saffarka ee laga helay sahanka xogta meesha laga bilaabay-loo socdo, fikradaha ku jira TPP, Thrive MSP 2040 iyo gacansaarka mashruuca transitway, dalbashada macaamilka ee loo diray Metro Transit Customer Relation iyo RSIP. Fikradaha shaqaalaha, ay ku jiraan fikradaha wakiillada ka socoda Transit Information Center, iyo jawaab-celinta laga helay mashruucyada kale ee deegaanka (Thrive MSP 2040, TPP, cilmi-baarista waaxda, iwlm.) ayaa sidoo kale loo tixgaliyay/qaddariyey.

Shaqalaha Metro Transit waxa ay fikradahaan kala soo dhex-baxeen hagaajinnada marinka qaaska ee baska, mashuuryaynta ilaha loo baahanyahay in lagu hirgaliyo hagaajin kasta (tusaale, saacadaha adeegga, saacadaha gaadiidka badan), iyo qiyaasay hagaajin kasta ee rakaabka cusub ee la filayo in ay miradhaliso.

Nidaamka doorashada waddada weyn ee laga firsanaanayo in ay noqon karto waddada mashruucyada Arterial BRT waxaa lagu sharaxay Metro Transit's Arterial Transitway Corridors Study (ATCS), taaso la sameeyay 2011-2012. Macluumaad dheeraada ee ku saabsan ATCS, ay ku jiraan warbixinnadda mashruuca iyo cusboonaysiinta, waxaa laga helayaa marka la galo [www.metrotransit.org/previous-arterial-BRT-studies](http://www.metrotransit.org/previous-arterial-BRT-studies)

### **Noocyada Hagaajinnada Adeegga (Types of Service Improvements)**

Mashruucyada waxaa lagu aqoonsadaa saddex heer ee dhaqangalin ku salaysan agaasimidda ama haynta heerarka buxiinta, hannaanka isticmaalka dhulka ee hadda jira ama lagu mustaqbalka lagu talagalayo iyo isku shandhaynta lagu hirgalinayo mashruuca transitway Projects: 2015-2017, 2018-2020 or 2021-2030. Shanta nooc ee adeegga hagaajinnada baska waxa lagu aqoonsaday: adeegga meel cusub, jiritaanka adeegga oo la fidiyo, tirada soc-socodka oo la wanajiyo, saffarka waqti ahaan dheereya iyo degganayaasha magaalada ee hareera magaalada ka shaqeeya. Mashruucyada degganayaasha hareera ka shaqeeya waxa ay isku xiraysaa degganayaasha Minneapolis ama St. Paul ee shaqooyin ku leh jaalliyadaha hareeraha magaalada deggan. Kuwo hagaajinnada badan ee la soo jeediyay waxa qancinayaan dabaqadaha hagaajinta dhowrka ah.

### **Hababka Qiimaynta (Evaluation Criteria)**

Siyaasadda deegaanka waxa ay aqoonsatay saddex hab ee muhiim u ah habab lagu qiimaynayo muhiimadda hagaajinnada adeegga baska. Marka laysku daro, hababkaan qiimaynta waxa ay xoogga saarayaan waxsoosaarka adeegga baska, hubinta cadaaladda bulshadeed iyo lagu bixiiyo nidaam jogaraafi ahaan leh hab miisaaman ah.

Hababka waxsoosaarka waxa ay muujinaysaa helitaanka rakaab ee hagaajinnada adeegga ayadoo la isticmaalayo isticmaalka dhulka iyo tirada iyo sababaha badnaanshaha degganayaasha. Hababka lagu talajiro tirada dadweynaha iyo shaqooyinka, Meelooyinka Shaqada Badan (Job Concentrations) ee loo adeegayo sida lagu aqoonsaday Thrive MSP 2040, rakaabka adeegga saacaddiiba, maalgalinta rakaabkiiba iyo tirada badnaaashaha degganayaasha. Hababka waxsoosaarka waxa ay metelaysaa boqolkiiba 50 ee wadarta dhibcaha laga helayo nidaamka qiimaynta.

Hababka xaqsoorka bulshadeed waxa ay qiimaynaysaa sida ugu fiican oo ay hagjinnada adeegga wax ugu qabtaan dadka ku tiirsan gaadiidka. Hababka la qaddariyay waxaa ka mid ahaa dhowr adeeg shaqooyin ee bixiya wax ka yar \$40,000 sanadkii, tirada gawaarida ka jira marka la barbardhigo dadwaynaha jira 16 sano iyo ka wayn, marinnada u adeegga dadwaynaha dan yarta ah, dadka midabka madow iyo dadka naafada qaba. Hababka xaqsoorka waxa ay u dhigmaan boqolkiiba 25 ee dhibaca qiimaynta.

Hababka isku xirnaanshaha hannaanka waxa ay dajinaysaa sida ugu wanaagsan oo ay mashruucyada u hormarinayaan xariirrada iyo adeegga ee degaanka Metro Service Transit. Hababka la qaddariyay waxa ay ahaayeen tiro isgoyada marinnada gaadidka, dadka ay u adeegayso marinka cusub ama fidinta marinka cusub, meelaha muhiimka ah ee la aadayo, Machadayada Waxbarashada loo adeegayo sida lagu aqoonsaday Thrive MSP 2040 iyo saacadaha gaadidka yar, muddada adeegga iyo/ama hagaajinnada gaadiidka qaada dadka u shaqo taga hareera magaalada. Hababka xariirinta nidaamka waxa ay u dhigmaan boqolkiiba 25 ee dhibcaha qiimaynta.

Hababka qiimaynta, ee qeexaya sida hab kasta loo cabbiro, oo ay la socdaan kaabiyada natiijada iyo misaanka taallaabo kasta waxa ay ku jiraan bogga dambe.

Kow iyo tobaanka mashruuc ee ku jira SIP dib looma eegin marka hababkaan la isticmaalay, sababto ah hadda kahor ayaa la qiimeeyay ayaga oo qeyb ka ah mashruuca ATCS.

### **Natiijooyinka Baaritaanka (Screening Results)**

SIP waxa ay metelaysaa natiijooyinka baaritaannada 185 ee hagaajinnada adeegyada baska ee adeegga degaanka Metro Transit. Ayadoo lagu salaynayo natiijooyinka qiimaynta, hagaajin kasta ee la soo jeediyay waxaa lagu cabbiray Sare, Dhexe ama Hoose Based (High, Medium, Low). Soo jeedinnada mutaystay ugu yaraan boqolkiiba 75 ee dhibcaha waxa ay heleen cabbir Sare (High); kuwa mutastay ugu yaraan boqolkiiba 55 ee dhibcaha waxa ay heleen cabbir Dhexe (Medium). Natiijooyinka baaritaanka waxa ay u aqoonsadeen 50 mashruuc ee Sare (High) iyo 87 mashruucyo ee Dhexe (Medium), kuwaaso mudnaasno u yeelanaya in la hirgeliyo marka la eego ilaha gacanta lagu hayo.

Affartan iyo sideed (48) mashruucyo ayaa mutaystay dhibco Hoose (Low). Ayadoo xilliga lagu jiro aan lagu talin hirgalin, mashruucyadaan waxaa la qiimayn doonaa mustaqbalka marka oddoroska 2040 ee dadwaynaha, qoysaska iyo shaqooyinka ay isticmaalaan jaalliyadaha xaafadaha ayagoo eegaya qorshoyinka si dhammaystiran loo cusbonaysiiyay, ama isticmaalka dhulka la hormarinayo ee la soo jeediyay.

Xisaabaadkan kuma ay jiraan mashruucyada kow iyo tobanka ee ABRT, kuwaaso aan lagu cabbirin High, Medium ama Low oo qeyb ka ah mashruucan. Waxaa hadda kahor lagu cabbiray in ay qeyb ka yihiin mashruuca ATCS.

### **Gunaanadka SIP (Summary of SIP)**

137 mashruuc ee keenay dhibcaha High ama Medium ayaa ah kuwa muhiimadda hirgalinta leh, 57 mashruuc ee joqaraafi aahaan fidinaya adeegga iyo wanaajinya isku xiriirinta, 70 soc-socodka la hagaajiyay ee marinnada la isticmaalo iyo 52 ee wata adeegga bilaabmaya subaxa hore iyo/ama shaqeeya habeenka waqti dambe. Waxaa kaloo jira mashruuc ee gaadiidka loo qadanayo shaqada hareera magaalada.

Hagaajinnada waxaa la qorsheeyay dhammaan qoondaymaha marinka, sida lagu qeexay 2040 TPP:

- 56 mashruuc ee marinnada muhiimka ee magaalada, waxa ay yihiin qaababka asaaska u ah shaqada xiriinta baska, kaaso dadka siinaya adeegyada laga maarmaanka ah ee ku xiriiraya xaruumaha waaweyn iyo gaadiidka waddooyin weyn mara.
- 35 mashruuc ee ka jira marinka rakaabka gaadiidka dheereya. Marinnada rakaabaaka iyo gaadiidka dheereya waxa loo sameeyay khaasatan in dadka laga soo qaado magaalada iyo hareera magaalada ee ka shaqeeya deegaanada gobolka shaqooyin loo aado, xoogsarista waqtiga saacadaha caadiga ee shaqooyinka la galo iyo laga baxo.
- 28 mashruuc ee ka jira marinnada hareera magaalada. Marinnadaan waxa ay bixiyaan helinta gaadidd isku xiriiriya qaybo waaweyn ee dadku aanu ku badnayn ee deegaanka adeega gaadiidka.
- 18 mashruuc ee marinnada taageeraya gaadika magaalada hoose, kuwaaso ee iskuxiraya waddoyinka u dhaxeeya xaafadaha ee aan caadi ahaan ku xirayn xaruumaha waaweyn, sida kuwa ku yaalla magaalooyinka hoose. Kuwaa waxaa loo sameeyay in ay dhammaystiraan laynka marinnada baaska magaalada hoose iyo fududeeya isku xiriirinta.

### Ilaha SIP (SIP Resources)

Shaxda 1 waxa uu muujinaya mashruucyada muhiimadda leh in la hirgaliyo (mashruucyada dhibcahooda Sare ama Dhexe ee mashruucyada Arterial BRT) waxaa loo baahanyahy \$98.3 malyan ee dheeraad ah sanad kasta illaa 2030, taaso ah kor u kac boqolkiiba 30 ee ka kormareysa miisaanaydda uu ku shaqaynayo baska 2015 Metro Transit. Mashruucyadaan waxa miradhalinayaan qiyaastii 29 malyan ee raacitaanka baska ee cusub, taaso ah kor u kac boqolkiiba 43 marka la bilaabo 68 malyan ee raacitaan ee 2014. Koritaanka qorsheyntaan waxu ugu badnaan dhici doonaa inta lagu jiro lixda sano ee ugu horreeya ee SIP ay u qabatay, bacdamaa mashruucyada oo idil ay ku jiraan Wajiga I ama II (Phase I or II). Kabidda caadiga ah ee rakaabkiiba ee mashruucyadaan oo nagonayso \$2.35, taaso ah mid wanaagsan iyo wax ku kordhin doonta iyo si wanaagsan guud wax ku kordhinaysa marinnada oo idil.

Shaxda 1: Raacitaanka iyo Ilaha Dheeraadka ee Sanadlaha (Additional Annual Ridership and Resources)	
<b>Adeegga Saacadaha Dheeraadka ee Sanadlaha (Additional Annual Service Hours)</b>	<b>870,000</b>
<b>Basaska Dheeraadka ee Saacadaha Gaadiidka Badan (Additional Peak Buses)</b>	<b>161</b>
<b>Rakaabka Cusub ee Sanadlaha (New Annual Passengers)</b>	<b>29 Million</b>
<b>Khrashka Dheeraadka ee Sanadlaha Lagu Shaqaynayo (Additional Annual Operating Cost) (\$2015)</b>	<b>\$98.3 Million</b>

<b>Kabitaanak Dheeraadka ee Sanadlaha (Additional Annual) Subsidy (\$2015)</b>	<b>\$67.3 Million</b>
<b>Kabitaanka Rakaabkiiba ee Hagaajinnada (Subsidy per Passenger for Improvements) (\$2015)</b>	<b>\$2.35</b>

Kharashka lagu shaqeynayo ee shaxda kore waxaa ku jira shidaalka iyo wadayaasha iyo shaqaalaha kale ee taageerada balse kuma ay jiraan kharashka lacagta sida soo gadashada gaadiidka ama fidinta xaruumaha baska lagu taageerayo baska si lagu diyaariyo adeeggaan dheeraadka ah. Waxaa kale ee meesha aan lagu xisaabinayn heerarka caadiga ee saamiga ee boqolkiiba 18 ama isbaddallada kale ee adeegga mashruucyadaan ay saadaalin karaan adeegyo lacag-la'an ah sida Transit Link ama Metro Mobility. Mashruucyadaan ee soo jeedinaya adeeg maalin oo dhan soconaya ee jaalliyadaha ay hadda ka shaqeeyaan saacadaha gaadiidka badan kaliya, ama aysanba geib ahaan ka sahqayn, iyo xitaa mashruucyada ballaarinaya muddada adeegga, waxaa saamayn ku yeelan doonaan adeegyada raacitaanka gaadiid la carbuunaysay (dial-a-ride services).

### **Tallaabooyinka Xiga (Next Steps)**

SIP waxa ay cusboonaysiin doontaa affartii illaa shantii sanaba si ay uga tarjumaan isbaddallada socodka dadka, hannaanada cusub iyo hannaanada dalbashada safarka. Tallabada xigta ee u jeedda hirgalinta ee hagaajinnada adeegga ee lagu sharraxay SIP ayaa ah in la helo dhaqaale dheeraad ah ee loo baahanyahay.